NAGAAD PROJECT

MASHRUUCA HORUMARINTA MAGAALOOYINKA SOOMAALIYEED

Qorshaha Maaraynta Deegaanka iyo Bulshada (QMDB)

UPDATED ENVIRONMENTAL AND SOCIAL MANAGEMENT PLAN (ESMP) AND STAKEHOLDER ENGAGEMENT PLAN (SEP)

DOWLADDA HOOSE EE KISMAYO

AUGUST 2023

Qorshahan Maareynta Deegaanka iyo Bulshada (oo loo soo gaabiyo "ESMP") waxaa loo diyaariyey Mashruuca adkeysiga magaalooyinka ee Soomaaliya (SURP II) oo uu maalgeliyo Bangiga Adduunka, kaasoo qorsheynaya inuu maalgeliyo dhismaha kaabayaasha waddooyinka ee magaalada Kismaayo iyadoo wadarta guud qeybta kowaad ay tahay 11.6km. Intaasi waxaa dheer dhisida dhuumo/bulaacado biyaha ka saara magaalada iyo dhismaha xafiiska ay adeegsadaan Qeybta fulinta Mashruuca (PIU) iyo shirkadda mashruuca kormeerka u qaabilsan iyo sidoo kale dhismaha shaybaarka lagu baaro qalabka dhismaha iyo alaabta.

Dukumiintigaan diyaarintiisa waxaa lagu saleynayay tilmaamaha Bangiga Adduunka qaab dhismeedka deegaanka iyo bulshada (ESF). Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan ESF waxaa laga heli karaa bogga Bangiga Adduunka (https://www.worldbank.org/en/projects-operations/environmental-and-social-framework).

Qorshaha Maareynta Deegaanka iyo Bulshada ESMP waxay sidoo kale fulisaa shuruucda iyo qawaaniinta jira ee Maamul goboleedka Jubbaland ee Soomaaliyeed. SURP II wuxuu leeyahay afar qaybood oo waaweyn:

- Kaabayaasha Wadooyinka Magaalada iyo Adeegyada
- Xoojinta Hay'adaha Dowlada iyo Xog- uririnta, iyo
- Maamulka Mashruuca, iyo ka Jawaabista Xaaladda Degdegga ah

Dokumiintigan (ESMP) wuxuu soo koobayaa Qataraha muuqda ee ku dhaci kara deegaanka iyo bulshada iyo saameynta mashruuca uu ku yeelan Maareynta Deegaanka iyo Bulshada ee lagu soo xusay (ESMF) wuxuuna qiimeynayaa qatarta deegaanka iyo bulshada iyo saameynta ay ku yeelan karaan 8 da jid/wadooyin ee laga dhisayo magaaladan Kismaayo.

Kaabayaasha cusub ee waddooyinka waxaa bar-bar socon doona dhismaha laba dhuumood oo daadadka roobka ka qaada jidadka la dhisayo kuna daraya badda qoryooley ee dhanka xaafada Daabyaanbo (Outfall one & Seaport Road outfall), iyo dhismaha xafiisyo ay ku shaqeeyaan shaqaalaha mashruuca iyo shaybaarka lagu baaro agabka dhismaha. Intaa waxaa dheer, qorshuhu wuxuu go'aamiyaa tallaabooyinka iyo kormeerka lagama maarmaanka ah ee lagu yareynayo saameynta mashruuca, si loo hubiyo in saameynta deegaanka iyo bulshadaba la yareeyay, iyo inay waajib tahay in la raaco tallaabooyinka yareynta saameyntaasi inta lagu jiro fulinta howlaha mashruuca.

Dukumiintigaan wuxuu kaloo tilmaamayaa natiijooyinka wanaagsan ee deegaanka iyo bulshada ee ka dhalan doono hirgelinta howlaha mashruuca. Shaqooyinka mashruucu waxay u badan doonaan kuwo muruq maal ah,(labor intensive) taas oo macnaheedu yahay in fursado shaqo oo aad u tiro badan loo abuuri doono dadka degan magaaladan Kismaayo (kuwa xirfad leh iyo kuwa

aan xirfad lahayn) qiyaastii 40 fursadood oo shaqo ayaa ka abuurmi kara dhismaha halkii (1) kiiloomitir kasta, taasoo ka dhigaysa wadar ahaan in kabadan 460 shaqo toos ah inay heli doonaan dadka deegaanka. Intaas waxaa sii dheer, shaqooyinka dhismaha dhuumaha daadadka qaadaya, (Drainage pipes), dhismaha xafiiska iyo sheybaarka oo ugu yaraan ayagana abuuri doona ilaa 75 fursado shaqo taasoo wadarta ee shaqa abuurista ee mashruucan ka dhigeysa ilaa 525 fursadood oo dhaqaale ay heli doonaan dadka degan Kismaayo muddada dhismaha mashruucan uu socdo. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan mashruucan waxaad ka daalacan kartaaa https://www.jubbalandmof.so/somalia-urban-resilience-project-ii-p170922/.

Marka laga soo tago faa'iidooyinka shaqo abuur ee inta lagu gudajiro wajiga kowaad ee dhismaha iyo waliba howlaha dayactirka wadooyinka ee danbe(O&M), shaqaalaha dowlada hoose iyo dadka degan magaalada waxay kororsan doonaa xirfado farsamo oo ku saabsan hormarinta wadooyinka iyo dayactirka,(knowledge transfer) iyo sidoo kale in la helo jawi nabdoon oo ku haboon isku socodka, nabad gelyada iyo caafimaadka guud ee bulshada.
Sidoo kale mashruucan waxuu xoojinayaa awoodda maamulka dowladda hoose ee horumarinta kaabayaasha iyo dayactirka, taasoo gacan weyn ka geysan doonta bilic-soo-celinta magaalada Kismaayo, oo horseedeed u noqon karta kor u kaca qiimaha hantida maguurtada ah (land) iyo soo jiidashada indhaha maalgashadayaasha.

Dukumiintigan Maamulka deegaanka iyo bulshada (ESMP)waxaa horey loogu sharaxay lana shaaciyay tixraac na u ah dukumiintiyada hoos ku xusan sida:, *Qaab-dhismeedka Siyaasadda Dib-u-dejinta (RPF)*
Qorshe Hawleedka Dib-u-dejinta mashruca (RAP),
Qorshaha Maareynta Shaqaalaha (LMP) iyo
Qorshaha ka qeybgelinta Daneeyeyaasha (SEF)

Dokumiintigan sidoo kale waxuu iftiiminaya doorarka iyo mas'uuliyadaha gaarka ah ee maamulka Jubbaland iyo qandaraaslayaasha mashruucu iyo tallaabooyin gaar ah oo lagu yareynayo saameynta xun ee dhismaha.
Waxuuna xoojinayaa doorarka gaarka ah iyo waajibaadka daneeyayaasha kala duwan ee mashruuca dhanka maaraynta deegaanka iyo bulshada.

S (P E I)

- Tayada hawada oo hagaagta, sababtoo ah wasaqowga hawada oo ay sababaan boorka, ciriiriga taraafikada, gubashada shidaalka, ayaa yaraada iyo sidoo kale waxaa hoos udhaca khataraha ka dhasha taraafikada.
- Badqabka guud ee dadweynaha oo hagaaga iyo xaaladaha waddooyinka oo casri ah uwanaagsanaada (dhabbaha, layrarka waddooyinka).

- Horumarinta dhuumaha biya saarka wadooyinka oo yareyneysa daadadka wadada kusoo rogmada, sidoo kale waxay yareysey nabaad-guurka dhulka iyo kororka cudurada ka dhasha biya fariisadka, sida daacuunka, shuban-biyoodka, duumada, tiifowga, IWM.

SAAMEYNTA TOGAN EE BULSHADA (POSITIVE SOCIAL IMPACTS)

- Isku socodka dadweynaha ee goobaha adeegyada guud oo fududaada, iyo waqtiga safarka oo yaraaday, ciriiriga taraafikada oo yaraada awgeed.
- Badqabka iyo amniga bulshada oo hagaagay iyagoo ku lugeyn kara jidadka, maadama layrarka cad-ceedda ku shaqeeya la dhisay.
- Fursadaha shaqo ee muddada gaaban ee bulshooyinka maxalliga ah sida barokacayaasha, dadka soo noqday, saboolka magaalooyinka iyo kooxaha nugul iyo horumarinta howlaha ganacsiga iyo nolosha.
- Qalabka dhismaha ee wadooyinka, xafiiska iyo shaybaarka waxaa intooda badan laga gadi doonaa magaalada Kismaayo, taasoo gacan ka geysaneysa kor u qaadista dhaqaalaha, ganacsiga, iyo gaadiidka intaba.
- Dhismaha iyo horumarinta wadooyinka waxay dhimi ciladaha iyo bur-burka gawaarida.
- Muuqaalka iyo bilicda magaaladana wuu hagaagayaa, waxaa sidoo kordhaya qiimaha hantida, sida dhulalka iyo guryaha guud ahaan iyo gaar ahaa kuwa dariiqyada ku yaala.

SAAMEYNTA TABAN EE DEEGAANKA (NEGATIVE ENVIRONMENTAL IMPACTS)

Saameyntani intooda badan waa kuwo yar yar oo maxalli ah, Waxaana ka mid ah kuwa soo socda:

- Wasakheynta (hawada, biyaha, carrada iyo buuqa) inta lagu jiro dhismaha.
- Qashinka ka dhasha bur-burka dhismaha Wadooyinka iyo sidoo kale xafiiska iyo shaybaarka.
- Wasaqda iyo qashinka ka dhasha tijaabada shaybaarka
- Maareyn la,aanta kiimikada sheybaarka ee halista ah iyo mida aan halista ahayn, oo ay ku jiraan qashinka kiimikada la isticmaalay oo meel aan ku habooneyn lagu daadiyay taasi oo waxyeeleyn karta xayawaanka shimbiraha, xasharaadka iyo xamaaratada(local fauna, birds, insect and reptiles.
- Burburka kala duwanaanshaha noolaha iyo muuqaalka dabiiciga ah ee meelaha walxaha kiimikada lagu daadiyo.
- Badqabka bulshada iyo Khataraha caafimaadka ee shaqaalaha mashruuca.
- Waxaa sidoo kale suurogal ah in waxyeelo taban ka dhalan karto biyaha roobka ee badda lagu darayo taasi oo soo gaartay noolayaasha badda(marine biodiversity) iyo dagax dixeedka(coral reef)
- Waxa kale oo jira waxyeelooyin suurtagal oo soo gaara dadka xeebata degan taasi oo saabsan maarayn la,aanta qashinka xeebaha markii ay mawjadaha badda qashinka soo raacay biyaha wasakhda ah ee ee magaalada kasoo rogmaday ay dib ugu noqdaan xeebta.

SAAMEYNTA TABAN EE BULSHADA (NEGATIVE SOCIAL IMPACTS)

- Luminta maciishada Nolol-maalmeedka kuwa ay howlaha mashruuca saameeyeen goobahoda shaqo (loss of livelihoods)
- Kororka ku dhaca Qulqulka shaqaalaha iyo khilaafaadka shaqaalaha dhexdooda(labor Labor influx and disputes).
- Xadgudubka suuragalka ah ee sharciyada shaqaalaha sida shaqaleysiinta carruurta.
- Khataraha Caafimaadka ee badqadka shaqaalaha mashruuca iyo sidoo kale bulshada deegaanka.
- Suurtagalnimada ka faquudida dadka nugul iyo kuwa tabaalaysan ee bulshada ka faa,iideysiga shaqada mashruuca.(of vulnerable and disadvantaged members)